# Foomka Jaango'an ee Codsiga Kaalmada Dhaqaale ee Isbitaallada New York

Waxaa laga yaabaa inaad u-qalanto kaalmada dhaqaale ee isbitaalka si aad u bixiso biilashaada haddii aadan caymis lahayn, haddii caymiskaagu dhammaaday, ama haddii aad leedahay caymis caafimaad balse aad haysato caddaynta kharashyada caafimaad ee la bixiyay ee wadartooda guud ay ka badan tahay 10% dakhligaaga. Buuxinta foomkani ayaa bilaabi doona codsigaaga kaalmada dhaqaale ee isbitaalka. Foomkani waxaa isticmaala dhammaan isbitaallada ku yaala Gobolka New York.

*Codsigani waa in lagu daabacaa luuqadaha[1] aasaasiga ah ee ay ku hadlaan bukaanada uu isbitaalku u adeego.*

### Magaca Bukaanka (ku buuxi macluumaadka ku khuseeya)

| | | |
|---|---|---|
| Magaca Bukaanka (Magaca Hore, Magaca Dhexe, Magaca Dambe) | | |
| Taariikhda Dhalashada (bb/mm/ssss) | | |
| Ciwaanka | Lambarka Duddada/Guriga # | |
| Caasimada | Gobolka | Koodhka Cinwaanka (Zip) |
| Lambarka Telefoonka # | | |
| Magaca Waalidka/Mas'uulka ama Wakiilka Idman (haddii uu bukaanku yahay ilmo aan qaangaarin ama qof weyn oo naafo ah) | | |
| Cinwaanka Iimaylka (haddii aad leedahay) | | |

### Macluumaadka Qoyska:

Fadlan hoos ku qor dhammaan xubnaha qoyskaaga. Qoyskaaga wuxuu ka kooban yahay adiga, xaaskaaga/saygaaga ama lammaane kula deggan, iyo carruur kasta ama dadka kale ee kugu tiirsan. Tusaale ahaan, tani waxaa ku jiri doona qof kasta oo ku qoran isla canshuur-celinta.

Dakhliga guud wuxuu ka dhigan yahay dakhligaaga **kahor** inta aan canshuurta laga jarin.

Dakhliga guud wuxuu ka koobnaan karaa dakhliga shaqada (gunnada, mushaarka, bakhshiishka, dakhliga ka soo xarooda iskaa-ax-u-qabsashada), dakhliga aan la kasban (caymiska bulshada, naafada, iyo gunnooyinka shaqo la'aanta), qaaraanka (lacagta laga helo qoyska ama asxaabta), iyo ilaha kale ee dakhli (kaalmada kumeelgaarka ah iyo kaalmada sugnaanta dakhliga ee dheeraadka ah).

| Magaca Buuxa | Xiriirka | Wadarta Dakhliga Guud (Ugu Dambeeyay) |
|---|---|---|
| | Adiga | |
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |

Isbitaalku wuxuu kaa codsan karaa inaad soo gudbiso dukumeentiyada caddaynaya dakhliga; tusaalooyinka dukumeentiyada waxaa ka mid noqon kara jeegga mushaarka, warqad ka socota loo-shaqeeyahaaga haddii la dabaqi karo, ama Foomka 1040.

[1] "Luuqadaha aasaasiga ah" waxaa ka mid ah luuqad kasta oo la iskula wada xiriiro ugu yaraan 5% booqashooyinka bukaanka sannadkii, ama luuqad kasta oo ay ku hadlaan in ka badan 1% dadka ku nool aagga adeegga aasaasiga ah ee isbitaalka, ee la xisaabiyay iyadoo la adeegsanayo macluumaadka dadweynaha ee laga heli karo Xafiiska Tirakoobka ee Mareykanka, oo ay kaabayso xogta nidaamyada dugsiyeed.

**Xaaladda Caymiska Caafimaadka**

Ma haysataa nooc caymis caafimaad ah, oo ay ku jiraan Medicaid, Medicare, ama caymis gaar ah oo loo-shaqeeyahaagu bixiyo ama aad adigu iskaa u soo iibsatay? ☐ Haa ☐ Maya

Haddii aad ku jawaabtay "Maya," ma jeclaan lahayd in lagaa caawiyo inaad codsato mid ka mid ah barnaamijyadaan?
☐ Haa ☐ Maya

**Bukaanada haysta caymiska bardhimanka ah: dadka haysta caymis oo uu uga baxo kharashaad caafimaad oo sarreeya.** Haddii aad caymis haysato, fadlan bixi qiyaasta biilasha caafimaadka ee aad bixisay 12-kii bilood ee la soo dhaafay.

| |
|---|
| $ |

Isbitaalku wuxuu kaa codsan karaa inaad soo gudbiso dukumeentiyada caddaynaya kharashaadka caafimaad ee la bixiyay.

**Bukaanka/Qofka Mas'uulka ka ah: Haddii uusan ahayn bukaanka, qor magaca qofka saxiixaya foomka iyo awoodda uu u leeyahay inuu saxiixo oo uu metelo bukaanka (sida, xaaska/sayga, waalidka, wakiilka sharciga ah).**

Waan fahamsanahay in macluumaadka aan soo gudbiyo in laga xaqiijin karo qolyo kale. Waxaan caddeynayaa in macluumaadku uu run yahay oo dhammaystiran yahay inta aan ogahay.

| | |
|---|---|
| Magaca Bukaanka | Taariikhda: |
| Xiriirka idin ka dhaxeeyo Bukaanka | |
| Saxiixa | |

# U-qalmitaanka Ugu Yar iyo Tilmaamaha

## Wakhtiga Go'an ee Codsiga, Xuquuqaha Bukaanka, iyo Qarsoodida

- Waxaad codsan kartaa kaalmo dhaqaale wakhti kasta inta lagu gudajiro geedi-socodka uruurinta.
- Ma ahan inaad wax lacag ah siiso isbitaalkani ilaa aad ka hesho go'aanka codsigaaga kaalmada dhaqaale. Isbitaalladu akoonnada uma gudbin karaan qolyaha uruuriya lacagaha inta codsigaagu socdo.
- Haddii laguu diido kaalmada dhaqaale, waxaad xaq u leedahay inaad racfaan ka qaadato. Macluumaadka khuseeya sida arrintani loo sameeyo ayaa la soo raacin doonaa ogeysiiska isbitaalka ee aad hesho. Waxaa laga yaabaa inaad xaq u leedahay inaad racfaan ka qaadato qaddarta kaalmadaada dhaqaale. Isbitaalku wuxuu soo raacin doonaa macluumaad ku saabsan sida racfaan looga qaato warqadda go'aankooda.
- Isbitaalladu uma diri karaan biilasha aan la bixinin hay'adda uruuriya lacagaha ugu yaraan 180 maalmood kadib biilkaaga ugu horreeya.
- Isbitaallada waa laga mamnuucay inay qaadaan tallaabo sharci ah, oo ay ku jiraan gudbinta dacwado, si dib loogu soo ceshado biilasha caafimaad ee aan la bixinin ee bukaanada dakhligoodu ka hooseeyo 400% heerka saboolnimada federaalka. Tilmaamaha saboolnimada ayaa halkani laga heli karaa: https://aspe.hhs.gov/topics/poverty-economic-mobility/poverty-guidelines
- Macluumaad kasta oo lagu bixiyay codsigani waxaa isticmaali doona oo keliya isbitaalka si uu u go'aamiyo u-qalmitaankaaga kaalmada dhaqaale wuxuuna ahaan doonaa mid qarsoodi ah ilaa inta uu sharcigu oggol yahay.
- Isbitaalku kuuma diidi karo adeegyada caafimaad ee lagama maarmaanka ah maadaama aad haysato biil caafimaad oo aadan bixinin.
- Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo codsigani, fadlan kala xiriir xafiiska kaalmada dhaqaale ee UVM Health Network (Shabakadda Caafimaadka ee UVM) lambarrada (802) 847-8000 ama (800) 639-2719.
- Haddii aad u baahan tahay caawimaad dheeraad ah in lagaa siiyo codsigani ama in lagaa caawiyo racfaan inaad ka qaadato go'aanka, waxaad la xiriiri kartaa Community Health Advocates (Qareenada Caafimaadka Bulshada): 888-614-5400.

## U-qalmitaanka

Ma jiraan wax xaddidaya awoodda isbitaalku u leeyahay inuu xaqiijiyo u-qalmitaanka bukaanka si loo sameeyo qiimo-dhimisyada lacageed ee heerarka dakhli ee ka sarreeya kuwa hoos ku xusan iyo/ama inuu bixiyo qiimo-dhimis lacageed oo ka badan kuwa uu qabo Sharciga Caafimaadka Dadweynaha. Intaas waxaa dheer, xaaladda socdaalka ma noqon doonto shuruud u-qalmitaan oo ujeeddada laga leeyahay ay tahay go'aaminta kaalmada dhaqaale.
Shakhsiyaadka soo socda ayaa u-qalma:

- Dadka dakhligoodu hooseeyo ee aan lahayn caymiska caafimaadka; ama
- shakhsiyaadka haysta caymiska bardhimanka ah (kharashaadka caafimaadka ee jeebka laga baxsho ee uruuray laba iyo tobankii bilood ee la soo dhaafay kuwaasi oo ka badan boqolkiiba toban dakhliga guud ee sannadlaha ah ee shakhsigaasi); ama
- dadka ay ka dhammaadeem dheefahooda caymiska caafimaadka, oo muujin kara in aysan awoodin inay bixiyaan kharashaadka buuxa; ama
- iyadoo ku xiran go'aanka isbitaalka, shakhsiyaadka muujin kara awoodid la'aanta inay bixiyaan lacagta go'an ee caymiska iyo/ama lacagaha la jari karo ee caymiska waxay codsan karaan lacag-dhimis ama qiimo-dhimis.

Shakhsiyaadka uu dakhligoodu ka hooseeyo ilaa 400% heerka saboolnimada federaalka ayaa xaq u leh kaalmo dhaqaale.

| **Heerarka Saboolnimada Federaalka (2026)** | | | |
|---|---|---|---|
| **Tirada Qoyska** | **200%** | **300%** | **400%** |
| 1 Qof | $31,920 | $47,880 | $63,840 |
| 2 Qof | $43,280 | $64,920 | $86,560 |
| 3 Qof | $54,640 | $68,300 | $109,280 |
| 4 Qof | $66,000 | $99,000 | $132,000 |
| 5 Qof | $77,360 | $116,040 | $154,720 |
| 6 Qof | $88,720 | $133,080 | $177,440 |
| 7 Qof | $100,080 | $150,120 | $200,160 |

Si sannadle ah loo cusbooneysiiyo: https://aspe.hhs.gov/topics/poverty-economic-mobility/poverty-guidelines

## Sicirrada Qiimodhimis ee Ugu Yar

Haddii aad u-qalanto kaalmo dhaqaale, kharashaadkaaga waxaa la dhimi doonaa iyadoo loo eegayo dakhligaaga oo loo adeegsanayo halbeegga hoos-u-dhaadhaca ee khidmadeed sida soo socota:

| **Heerka Dakhliga** | **Lacagta** |
|---|---|
| **Ka Hooseeya 200% FPL** | Laga dhaafay dhammaan dallacaadaha |
| **200% - 300% FPL** | Bukaanada aan caymiska lahayn: Halbeegga hoos-u-dhaadhaca ilaa 10% qaddarta ay adeegga(yada) ku bixin lahayd Medicaid.<br><br>Bukaanada haysta caymiska bardhimanka ah: Ilaa ugu badnaan 10% qaddarta la bixin lahaa iyadoo la raacayo heshiiska wadaagga kharashka caymiska ee bukaankaasi. |
| **301% - 400% FPL** | Bukaanada aan caymiska lahayn: Halbeegga hoos-u-dhaadhaca ilaa 20% qaddarta ay adeegga(yada) ku bixin lahayd Medicaid.<br><br>Bukaanada haysta caymiska bardhimanka ah: Ilaa ugu badnaan 20% qaddarta la bixin lahaa iyadoo la raacayo heshiiska wadaagga kharashka caymiska ee bukaankaasi. |

## Qorsheyaasha Kis-kis U-Bixinta

Qorshayaasha kis-kis u-bixinta lacagaha ayaa diyaar u ah bukaannada aan awoodin inay hal mar wada bixiyaan sicirrada la dhimay. Lacagaha billaha ah kor uma dhaafi karaan 5% dakhligaaga guud ee billaha ah oo sicirka dulsaarka ah ee lagu soo dallaco bukaanka ee ku qoran dheelitirka lacagaha aan la bixinin, haddii uu jiro, kor uma dhaafi doono 2%.

## Codsiga Caddeynta Dakhliga Qoyska

Fadlan soo raaci macluumaadka dakhliga bukaanka, xaaskooda/saygooda, iyo dadka ku tiirsan (sida carruurta). Tusaale ahaan, tani waxaa ku jiri doona qof kasta oo ku qoran isla canshuur-celinta (qofka canshuurta xareeya, xaaska/sayga, iyo dadka ku tiirsan canshuur-bixiyaha) marka la xisaabinayo dakhliga qoyska.

Liiska dukumeenti ee soo socda waa liiska dukumeentiyada aad u isticmaali karto inaad ku caddayso dakhligaaga. Kuma khasbanid inaad keento dhammaan dukumeentiyadaan. Waxaad sidoo kale bixin kartaa warbixin khuseysa inaadan dakhli qoys lahayn haddii uusan dakhli ku soo gelin.

Sidoo kale waxaad ku soo sheegi kartaa bogga go'aaminta U-qalmitaanka ee NY State of Health Marketplace (Suuqa Caafimaadka ee Gobolka New York). Haddii aad haysato dukumeentigan, lagaagama baahno inaad isbitaalka siiso macluumaadka kale ee dakhliyeed ee hoos ku qoran.

| <u>**Haddii uu Qoysku Helo:**</u> | <u>**Qaddarta Bil Kasta:**</u> | <u>**Codsadaha Wuu Bixin Karaa:**</u> |
|---|---|---|
| Gunnada | $ | Fadlan bixi hal xabo oo jeegga mushaarka ah, ama Warqad ka socota Loo-shaqeeyaha oo leh summada shirkadda, oo la saxiixay oo taariikhaysan, ama warqaddii ugu dambeysay ee canshuur-celinta dakhliga ee la xareeyay. |
| Lacagaha Sooshiyal Sikuuritiga | $ | Nuqulka warqadda abaalmarinta/shahaadada, ama warqad ka socota Maamulka Sooshiyal Sikuuritiga ee Maraykanka, ama warqadda dheefta sanadlaha ah. Si aad u codsato nuqulka warqadda dheeftaaada Sooshiyal Sikuuritiga, wac 1-800-772-1213 ama booqo www.ssa.gov. |
| Magdhowga Shaqo-la'aanta | $ | Nuqulka warqadda abaalmarinta/shahaadada, ama bayaanka dheefaha billaha ee ka socda Waaxda Shaqada ee NYS, ama Nuqulka Kaarka Lacag-bixinta Tooska ah oo daabacan, ama Warqadaha ka socda Waaxda Shaqada ee NYS, ama Macluumaadka akoonka adeeg-qaataha oo daabacan ee laga helo mareegta Waaxda Shaqada ee NYS (www.labor.state.ny.us). |
| Lacagta Naafada | $ | Nuqulka warqadda abaalmarinta/shahaadada, ama waraaqaha Maamulka Sooshiyal Sikuuritiga, ama nuqulka warqadda dheefta sanadlaha ah. Si aad u codsato nuqulka warqadda dheeftaaada, wac 1-800-772-1213 ama booqo www.ssa.gov. |
| Magdhowga Shaqaalaha | $ | Nuqulka Warqadda Abaalmarinta ama Jeegga mushaarka. |
| Taageerada Garoobta/Carruurta | $ | Nuquka amarka maxkamadda, ama 3 bilood oo jeeggaga/rasiidhyada la lacageeyay ah. |
| Saami-qeybsiga/Dulsaarka | $ | Bayaanada saami-qeybsiga rubuc-sanadeedka ah ama bayaanada 1 bil ah. |
| Wax kale | $ | Warqad sheegaysa qaddarta dakhli ee aan mushaarka ahayn (haddii ay jirto), sida dakhliga kirada, lacagta caddaanka ah ee shaqooyinka aan caadiga ahayn, iwm. |
| Dakhli Aan Soo Gelin | $0 | Bayaanka saxiixan ee dakhli la'aanta. |